

”Velkommenoslo.no” waa bog ”Internett”ka ku salaysan oo loogu talagalay gaar ahaan dadka qaxootiga ah iyo ajnebiga ku cusub Oslo. Boggani waxa isaga oo dhammaystiran uu ku qoran yahay luqadaha norwejiga iyo ingiriisiga, isaga oo la soo koobayna luqaha carabiga, ruushka, somali, isbaanish iyo urdu.

Boggan ”Internett”ka waxa laga heli karaa warbixin faaiido badan oo ku saabsan :-

Aqbalaadda waxbarashada lagala yimi debedda

Haddii aad debedda kala timi waxbarasho heer dugsi sare ah ama mid ka heer sarraysa, waxa kuu suuragal ah in aad warqadaha waxbarashadaada aqoonsi uga hesho Norway. Aqoonsiga warqadahaaga waxbarasho waxa uu muhiim u yahay marka aad shaqo codsanayso ama aad waxbarashadaada sii wadanayso.

Waxbarasho

Boggan waxad ka heli kartaa warbixin ku saabsan waxa lagaa doonayo in aad samayso haddii aad qaadanayso waxbarashada asaasiga ah (dugsiga hoose/dhexe) ee dadka waaweyn, dugsiga sare ama waxbarasho machad sare / jaamicad. Waxa kale oo boggan laguugu sharxayaa shuruudaha gaarka ah ee laga rabo dadka ajnebiga ah, sida waxbarashada loo maalgeliyo iyo xilliyada kama dambaysta ah ee codsiyada la gudbin karo.

Shaqo

Waxa boggan kuugu sharxan waddada loo maro shaqo codsiga oo tafatiran : halka aad ka heli karto shaqooyinka bannaan, sida aad u qoran karto codsi shaqo oo fiican iyo ”CV” iyo sida aad ugu diyaar garoobi lahayd waraysi shaqo(interfiyuu). Waxa kale oo aad ka heli kartaa waxyaalaha uu kuu fidin karo xafiiska shaqadu.

Barashada luqada norwejiga iyo xirfad samaysiga

Waxa aad boggan ka helaysaa goobaha laga baran karo luqada norwejiga ee Oslo ku yaalla iyo barnaamijyada xirfad abuuridda ee ay bixiyaan xaafaduhu. Waxa kale oo aad ka heli kartaa goobaha barashada luqada iyo ku tababarashada shaqo iyo goobaha carruurta laguugu hayn karo inta aad casharada qaadanayso. Waxa iyana aad ka heli kartaa halkan warbixin ku saabsan imtixaanada luqada iyo tijaabooyinka luqo ee sarsare (”Bergenstesten”).

Waxqabadyada adeegga guud

Waxa boggan ku jira warbixino la xidhiidha guryaha, xannaanada carruurta (barnehage), caafimaadka, adeegyada arrimaha bulshada, xuquuqda caymiska, dhaqanka iyo isbortiga iyo ururro kala duwan.

